

Ku soo dhowow dugsi-horaadka!

Ku socota ardayga dugsi-horaadka

Deyrta soo socota waxaa billaabanaya dugsi-horaadka.

Dugsi-horaadka waxaad ciyaar ahaan, jimicsi, baaritaan iyo farshaxan ahaan ku baranaysaa wax cusub. Waxaad ku baranaysaa saaxiibo cusub waxaad ka uruursanaysaa buurso buuxda oo waayo-aragnimo ah. Waxaadna sidoo kale inta sannadka lagu jiro soo qooraansan doontaa waxa ka dhacaya dugsiga.

Macluumaad mas'ulka loogu talagalay oo ku saabsan qabanqaabada waxbarasho-horaadka

Waxbarasho-horaadku waa waxbaris iyo barbaarin hadaf leh islamarkaasna qorsheysan, taas oo ay ka muuqato waxqabad iyo ciyaar. Hiigsigu waa in la horumariyo lana kaalmeeyo waxyaabaha loogu baahan yahay waxbarashada iyo barbaarinta ee cunugga iyo sare u qaadista uwareegista dugsiga oo caadi ah. Wadada waxbarashada cunuggu waxay ka baxaysaa barbaarin-horaadka waxayna iyadoo sii mareysaa waxbarasho-horaadka u gudbaysaa waxbarashada aasaasiga ah.

Waxbarasho-horaadku waa lacag la'aan waxaana inta badan la bixiyaa afar saacadood maalintii inta lagu

jiro wakhtiyada ay dugsiyadu shaqeeyaan. Barbaarin-horaadku waxay u sii soconayaa qaab dhammaystir u ah waxbarasho-horaadka iyadoo waafaqsan baahida goyska. Cunug kasta waa in uu ka qeybqaataa waxbarasho-horaadka sannad kahor inta ay uusan billaaban waajibka waxbarashadu. Mas'uuliyadda ka qeybqaadashada cunuggu waxay saaran tahay mas'ulka cunugga.

Waxbarasho-horaadka ku baxda afka Finnishka waxaa magaalada Helsinki looga qabanqaabiyaa xannaano-maalmeedyada degmada iyo kuwa gaarka loo leeyahay.

Sidee loo codsadaa waxbarasho-horaadka?

Waxbarasho-horaadka waxaa la codsanayaa wakhtiga u dhexeeya 7.–23.1.2020. Codsashadu waxay ka dhaceysaa arrimo fullinta elgtroonigga ah ee Helsinki. Haddii aysan codsashada elegtroonigga ah suurtagal aheyn, foom warqad ah ayaa lagu codsan karaa, foomkaas oo xannaano-maalmeedka loo soo celinayo. Waxbarasho-horaadka xannaano-maalmeedka gaarka loo leeyahay toos ayaa xannaano-maalmeedka looga codsanayaa.

Booska waxbarasho-horaadka waxaa cunugga ugu horeyn qaab waafaqsan deegaankiisa laga siinayaa soonaha arday u qaadashada. Macluumaadka ku saabsan booska waxbarasho-horaadka ee cunuggiina waxaan idiin soo direynaa todobaadka 13aad.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan jadwallada qabanqaabinta waxbarasho-horaadka waxaa laga helaa bogagga shabakadda Helsinki hel.fi/preschool



Helsinki

Education division
hel.fi/preschool